Kita-Einstieg: Iskuxirka waxbarashada asaasiga ah*

Warbixinta Daryeelka Dhallaanka, Gießen

Gießen Universitätsstadt

Deutscher Kinderschutzbund e.V. (DKSB)

die lobby für kinder

Frühe Bildung: Gleiche Chancen

Bundesprogramm Kita-Einstieg Brücken bauen in frühe Bildung

Gefördert vom:

Bundesministerium für Familie, Senioren, Frauen und Jugend

* „Kita- Iskuxirka Waxbarashada Asaasiga ah waa Barnaamij ay Wasaarada Qoyska, Dadka waaweyn, Haweenka iyo Dhalinyaradu ay soo qabanqaabisay.

KU WAALIDKA!

Xanaanada Caruurta ee (KITA) iyo barnaamijka xanaanada dhallaanka ee maalinlaha ahi waa goob ku wanaagsan nabadgelyana u ah ilmaha. Halkaaso dhalaankaga lagu xanaaneyn doono, ku ciyaari karaan ilmuhu waxna ku baranayaan. Waxa intaas usii dheer; ilmahaaga Maalinta uu dhasho ilaa inta uu iskuulka ka gaarayo xaq ayuu u leeyahay inuu ka faa iidaysto barnaamijka Kita ama daryeelka ubadka ee maalinlaha ah!

WA MAXAY KITA?

Waa goob Caruurta aan weli gaarin iskuulka lagu barbaariyo.

Qolalka ama banaanka goobta waa meelo ay caruurtu ku ciyaari karaan, ku socsocon karaan, farshaxan ku samayn karaan, waxku cuni karaan ayna seexan karaan. Mararka qaarna xaflado loogu dhigi karo ilmaha.

Kita waxaa ka shaqeeya macalimiin iyo xanaaneeyayaal u badan Haween iyo rag kuwaasoo xirfad aqooneed dheer u leh shaqadooda; isla markaana ku xeeldheer kobcinta dhallaanka, daryeelkooda iyo caawimaada ay u baahanyihin ilmuhu. Kita waxay leedahay qaybo kala duwan, qayb kastaana caadi ahaan waxay ka kooban tahay 20 ilaa 25 ilmood. Caruurta ka yar 3da Sano waxay leeyihiin qayb u gaar ah oo caruurta ku jirtaana yartahay. Qaybta dhallaanka socod baradka (gurguurta) ee Kita marmarna lagu magacaabo qaybta Qoyska.
Sidoo kale waxa caruurta iyo dadka waaweyn (waalidiinta) loo ogol yahay had iyo jeer inay isu yimaadaan isla markaana wada ciyaaraan, wada heesaan waxna ay wada cunaan kuwaasi oo ka soo jeeda dhaqamo kala duwan.

KITA iyo xarunta baxnaanada dhalaanka Maalinlaha ahba waxaa waalidku ku baran
Doonaa waalidiin iyo dhalaan kale ;Saas darteed, Qoyska Kastaa Waanso Dhaweyn

WA MAXAY XANANADA MAALINLAHA AHI?

Daryeelka ubadka ee Hooyada ama aabaha ayaa lagu magacaaba Xanaanada ubadka joogtada ah.

Dadka xanaaneeya ubadku waa dad loo aqoonsaday loona tababaray daryeelka dhallaanka; kuwaasoo soo bartay tacliin iyo koorsooyin quseeya daryeelka dhallaanka.

Kita waxay kusii wanaagsan tahay noocyada daryeelka ay bixiso iyo halka ay ku taalo.

Daryeele kasta ama halkii Macalinba waxa uu si khaasa u tabantaabiyaa 5 ilmood kuwaasi oo had iyo jeer 3 sano jir ka yar.

Caruurta ay da'doodu ka weyntahay 3da sano waxay had iyo jeeraale xaadiraan Kita.

Macalimiinta xanaanada maalinlaha waxad ka heleysaa xarumaha waa weyn e Kita ama guryaha gaarka ey u leyihin. ah waxay joogi karaan gurigaaga ama halka uu ku nool yahay Xanaaneeyuhu. Sida xarunta Kita oo kale ayaana halkaas ku ciyaari kartan, ku socsocan kartan waxna ku cuni karaan seexana karaan.

MAXAY U TAHAY MUHIM XANANADA DHALANKU? Kita iyo Xanaanadaba waxay dhallaanku isku bartaan dhallaan kale isla markaana saaxiibo ku samaystaan, waxayna si deg dega u bartaan luuqada Jarmalka. Sidoo kale waxay dhallaanku bartaan waxyaalo badan oo muhiim u ah iyo xalinta waajibaadka. Arintan ayaa aad muhiim ugu ah u diyaarinta dhallaanka inay iskuulka aadaan. Marka ilmahaaga laguu daryeelayo; waalidku waxa uu helaya fursad uu shaqo ku tago, waxku barto amaba uu hawlihiisa guriga ku qabsado.

TALABADA KOWAAD:

ISDIIWAANGELINTA

Aad ayay muhim u tahay inaad xili hore isdiiwaan gelisid si'aad ugu hesho ilmahaaga boos. Gaar ahaan, marka aad xaqiiqsatid in ilmahaagu Kita ama Xanaano u baahan doono. 3 sano kahor ayaad awoodaa inaad dalabkaaga sii sameysid amaba xitaa xiliga aad uurka leedahay. Gießen dadka kunool waxay sidoo kale ka xereysan karaan dalabkooda biriq diraha (internetka) gaar ahaan boga LITTLE BIRD amaba Kita ayay toos ugu tagi karaan.Boga LITTLE BIRD waxa aad ka arki kartaa halka xarumaha Kita ay ku yaalaan. Laakiin boos iskama heleysid balse waxay kuusoo celinayaan jawaab hadii ay jirto boos ka banaan xaruntaas. Hadaba sida ugu dhakhsiyaha badan fadlan ula xiriir una weydii su aalahaaga muhimka ah mareegtan!

➔https://portal.little-bird.de/Giessen

LITTLE BIRD waxa macquula inaad 5 codsi halmar sameyso. Waa inaad sidoo kale codsataa Kita xitaa kuwa aan deriska markaas kula ahayn. Marka aad jawaab casumaad ka heshid LITTLE BIRD waa inaad shakhsi ahaan u tagtaa Kita adigu..

WADAHADALKA ISDIWANGELINTA

Marka lagu sheego inaad u heshay boos ilmahaaga, waxa waalidku wadahadal la yeelanayaa maareeyaha xarunta Kita. Wadahalkaas waxa lagu magacaagaba wadahadalka aqbalaada. Kaas oo ay macalimiinta iyo xaneenayaashu ku dersaan kuna ogaadaan ilmahaagu waxa uu jecelyahay iyo waxyalaha uusan jeclayn waxayna su aalo kaa weydiin doonaan ilmahaga. Sido kalena waa inaad horey uso qaadataa baasaboorka cunugaga iyo buuga talaalka, sidoo kale waa inaad dhakhtarka dhalaanka kasoo qaadataa warqada cadaynta caafimaad qabka ilmahaaga. Waxa muhim ah hadaba inaad intaanad iman wada hadalkan aad u tagtid dhakhtarka caruurta.

CAWINAADA LITTLE BIRD:

Tiimka Kita ayaa kaa caawinaya buuxbuuxinta dalabkaaga intarnetka.

XILIYADA WADAHADALKA:

Khamiista 2aad iyo tan 4aad ee bilkasta:

14-16 Uhr Goobta **Ostanlage 21**, 35390 Gießen una dhexeysa Landgericht iyo Standesamt, ku hagaag ‚Kita-Einstieg'

U DIYAAR GAROWGA IYO AADISTA ISKUULKA: Caruurta waxa laga maarmaan u ah inay Waxbartaan, Koraan isla markaana Ciyaaraan. Macalimiinta iyo xanaaneeyayaasha caruurta ayaa ka qayb qaata horumarinta dhalaanka isla markaana u diyaariya inay iskuulka aadaan. Barnaamijkan Kita waxa uu sido kale jaanisyo siinaya Caruurta waaweyn. Saas darteed Muhim maaha in ilmahaagu yaqaano wax akhriska, qoraalka amaba xisaabta; dhamaan waxa uu ku baran doona iskuulka.

MAXA XIGA?

ISDHEXGALKA IYO LAQABSASHADA

Bilowga hore ee KITA waxa la yiraahda isdhexgal iyo isfahan. Kaaso u ah dhalaanka iyo waalidka xooso gaar ahna uleh.Marka xiga caruurtu waxa ay la qabsanayaan xarunta xanaanada iyo bay´adda.Saas darteed 4 ta ilaa 6da asbuuc ee ugu horeysa waalidku waxa uu imanayaa goobta isla markaana mudo cayiman lajoogayaa ilmaha ilaa inta uu kala qabsanayo ilmuhu uuna fahmayo xanaanada. Arintaas waxaad kala hadli doonta Barayaasha iyo xanaaneeyaha.

WAA IMISA QIMAHA XANAANADU?

Qiimuhu wuu kala duwan yahay. Gießen dhexdeeda daryeelka ilmuhu waxa uu ku xiran yahay dakhliga waalidka. Waalidka dakhligoodu yaryahay waxa uu bixinayaa kharash yar ama waa inuusan waxba bixin. Waalidka dakhligoodu badan yahay waxa ay bixinayaan wax badan; Badanaa waxa lacag ah cuntada qadada.

XILIYADA XANAANADA:

Waxa jira KITA maalinka oo dhan ah iyo KITA saacado kooban ah. Gießen dhexdeeda badana KITA waxa ay furan yihiin maalmaha ISNIIN-JIMCE 7:30 subaxnimo ilaa 16:30.Markaad dooneysid inaad ilmaha keentid ama aad ilmahaaga qaadatid waa inaad marka hore la hadashaa baraha amba xanaaneeyaha.

MACLUUMAAD DHEERI AH EEE SHABAQA

- **Bogaga barnaamijta gobolka**: https://www.fruehe-chancen.de/themen/integration/auf-einen-blick/links-und-downloads/
- **Filimka Xananada** af Jarmal: https://www.youtube.com/channel/UCl0FroO4AoHTp8JLM9EUw0g
- **Tilmaanta Little Bird** oo luuqado kala duwan ah: https://www.little-bird.de/service/anleitung/
- **Taloyin Waxbarasho** oo luqado kala duwan ah: https://www.stark-durch-erziehung.de/downloads/index.php
- **Iscaawinta Waalidiinta i.w.** waxay ka cawinaysa hooyada iyo abaha barbaarinta dhalanka iyo isdhexgalka baraha iyo xanaaneyayaasha: https://www.ehe-giessen.de/
- Warbixino kale **kusabsan Xananada malinlaha ah ee dhalanka**: https://www.bvktp.de/themen/kinder-mitfluchthintergrund

GOOBAHA LAGALA XIRIIRI KARO

KITA-EINSTIEG: Ostanlage 21, 35390 Gießen

Telefon: 0641 984447914

Mobil: 0178 7649760

E-Mail: Lotte.Bauer@giessen.de